



Miyaad raadinaysaa shaqada dhismaha?

Shirkadda Galaxen Bygg waxay taageertaa oo ay abuurtaa fursadaha shaqada dhismaha ee dadka soo galooti ah iyo dadka waqti dheer aanan shaqo haynin.

Nala soo xiriir si aad war dheeraad ah u hesho!

Sida shirkadda Galaxen Bygg kuu taageeri karto

Haddii aad tahay qof dhawaan soo galay dalka Iswiidhan ama aadan waqti dheer shaqo haynin, shirkadda Galaxen Bygg waxay kaa caawin kartaa in aad shaqo ka hesho laanta dhismaha. Mararka qaar, waxaad fursad u heli doontaa in aad gasho tababar xirfad barasho si aad u hesho shahaadooyin xirfadeed.

Waxaan soo ogaannaa hadafyadaada iyo khibraddaada shaqo oo aan ku toosinno baahiyaha loo-shaqeeyaha.

Si aad ugu habboonaato shirkadda Galaxen Bygg, waa in aad marka ugu horraysa danaynayso in aad ka dhex shaqayso laanta dhismaha – adigoo tusaale ahaan no-qonaya nijaar, rinjiyeeye, koronto yaqaan, rakibaha qalabka HVAC ama injiniir qaabdhismeed.

Si aad u dalbato taageerada shirkadda Galaxen Bygg, waa in aad buuxiso foom codsasho oo aad u dirto qofka xiriirka habboon ah ee halka aad ku nooshahay. Marka aan codsashadaada helno, waan wada kulmi doonnaa si aan uga hadalno aasaaskaaga, aqoontaada iyo khibraddaada. Ka dib adiga ayaan kula shaqayn doonnaa si aan kuugu soo helno shaqo kugu habboon. Haddii aan soo helno loo-shaqeeye si fiican kuugu toosan, shirkadda Galaxen Bygg waxay kaa caawin doontaa dukumeentiyada shaqada iyo la qabsiga goobta shaqada, ka dibna si joogto ah ayay kuu soo waraysan doontaa si ay u eegto xaaladdaada.

Xafiiska Shaqada ayaa xaaladda ka fiirsan doona oo go'aamin doona taageerada maaliyadeed ee la siinayo loo-shaqeeyaha, taasoo ku xiran nooca shaqada. Waxay ujeeddadu tahay in aad aakhirka hesho shaqo joogto ah oo aanan kabitaan lahayn.

Shirkadda Galaxen Bygg waxaa gebi loogu hawlgeliyaa macaash la'aan waxayna soo jirtay tan iyo 1986. Sanad kaste, qiyaastii 500 oo qof ayaan ka caawinnaa in ay shaqo galaan. Nala soo xiriir si aad war dheeraad ah u hesho!

Shuruudaha dadka soo galooti ah:

- Waa in aad kaalinta shaqo raadiye kaga qornaato Xafiiska Shaqada.
- Waa in aad ahaato soo galooti marka la raaco macnaha Xafiiska Shaqada: shaqo raadiye helay rukhsadda degganaanshaha 36kii bilood ugu dambeeyey.
- Waa faa'iido dheeraad ah haddii aad khibrad ka haysato dhismaha, laakiin haddii maya waxaad u baahan tahay uun in aad danaynayso in aad xirfad ka bilowdo laanta dhismaha.
- Waa in aad ku hadli karto afka Iswiidhishka.

Shuruudaha dadka waqti dheer aanan shaqo haynin:

- Waa in aad kaalinta shaqo raadiye kaga qornaato Xafiiska Shaqada.
- Waa in aadan waqti dheer shaqo haynin marka la raaco macnaha Xafiiska Shaqada: Waxaad tahay ugu yaraan 25 jir waxaanad si buuxda shaqo u haynin 12 bilood. Waxaad tahay 15–24 jir waxaanad shaqo haynin oo aad kaalinta shaqo raadiye uga qornayd Xafiiska Shaqada ugu yaraan 90 maalmood muddo afar bilood ah.
- Waa faa'iido dheeraad ah haddii aad khibrad ka haysato dhismaha, laakiin haddii maya waxaad u baahan tahay uun in aad danaynayso in aad xirfad ka bilowdo laanta dhismaha.
- Waa in aad ku hadli karto afka Iswiidhishka.

Foomamka codsashada iyo macluumaadka xiriirka ayaad ka heli kartaa halkan galaxen-bygg.se